Seattle Parks & Recreation

Sida loo dhammeystiro Codsigaaga Deeqda Waxbarashada – 5 tallaabo oo fudud!

Waxaan rajeynaynaa in aan kuu adeegno waxaanna filaynaa in aad ka hesho ka-qeybgalka barnaamijyadeenna.

Tallaabada 1: **Macluumaadka Ka-qeybgalaha**

- Buuxi macluumaadka Qaangaarka Aasaasiga ah

Tallaabada 2: **Macluumaadka Ka-qeybgalaha iyo Dhammaan Xubnaha Qoyska**

- Buuxi magaca, taariikhda dhalashada, jinsiga iyo qowmiyadda xubin kastoo ka tirsan qoyska/reerka

Tallaabada 3: **Xaqiijinta <u>Dakhliga Qoyska</u> iyo <u>U-qalmitaanka Ku-tiirsanaha</u>**

- Buuxi dakhliga guud ee qoyska, calaamadee sanduuqa haddii kani uu yahay dakhli *bille* ama *sannadle*, ku qor tirada dadka ee qoyska.
- Waa in aad **ku soo lifaaqdo caddeynta dakhliga** ee **dhammaan** dadka waaweyn iyo **caddeynta ku-tiirsanayaasha/** cunuga(carruurta)
- Xaqiijinta la doorbido ee <u>dakhliga iyo ku-tiirsanayaasha/cunuga(carruurta)</u> waa ***dokumentiga canshuurta takhliga ee 1040*.**
- *Dokumentiyada kale ee la aqbaley ee loogu talogaley **xaqiijinta dakhliga iyo ku-tiirsanayaasha** waxaa liiskooda lagu qoray xagga hoose:*

- *Dheefaha **Damaannada Bulshada** (SSA ama SSA-1099).*
- ***TANF/ Cayrta** Hadda**.***
- ***Xaqiijinta Ardeyga Wakhtiga-buuxa waxbarta** (Jadwalka Fasalka iyo Waraaqaha Gargaarka Dhaqaale).*
- ***Caddeynta Mushaharka Naafonimada** (SSI).*
- ***Bayaanka shaqo la'aanta.***
- ***Caddeynta Hawlgabka.***
- ***Gummadka jeegga mushaarka guud ka hor** canshuuraha (1 bil ee 32+ ama 2 bilood ee 31 saacadood ama ka yar ee dhammaan dakhliga qoyska).*
- ***Shuruudda barnaamijka Qiimo-dhimista Kharashaadka Korontada iyo Gaaska ee Magaalada Seattle** (50% keliya deeq waxbarasho, bixi bayaanka biilka).*
- ***Lacag-bixinnada taakuleynta carruurta** (aan loo isticmaalin keliya caddeynta guud ee dakhliga dheeraadka ah)*
- *Caddeynta kale ee **<u>Ku-tiirsanayaasha</u>-** Shahaadada Dhalasha*

Tallaabada 4: **Soo-gudbi codsiga dhammeystiran oo la socda xaqiijinta dakhliga iyo dokumentiga ku-tiirsanayaasha shaqaalaha xarunta biyaha ama madadaalada.**

- Codsiga aan dhammeystirnayn ama dakhliga maqan ama dokumentiga ku-tiirsanaha waxay dib u dhac u keenayaan awooda aan ku socodsiinayno codsigaaga.
- Haddii aad codsaneyso deeqaha waxbarasho ee daryeelka carruurta jirta da'da dugsiga dhammeystir tallaabada 5aad ka hor inta aadan soo gudbin codsiga.

Tallaabada 5: **KELIYA haddii aad codsaneyso deeqda waxbarasho ee daryeelka carruurta jirta da'da dugsiga (bogga 2aad ee foomka deeqda waxbarasho)**

- **Buuxi goobta daryeelka da'da Dugsiga ee la codsadey.**
- **Buuxi macluumaadka cunuga (carruurta).**
- **Keliya calaamadee barnaamijyada aad doonayso cunugaaga in uu ka qeybgalo.**

Muhiim ah - Fadlan hoos akhri. Hadaad rabto sharaxaad badan oo qoto-dheer oo ku saabsan siyaasadaha carruurta jirta da'da dugsiga fadlan akhri macluumaadka ku qoran dhinaca dambe.

* Waa in aad soo gudbiso foomka Ogeysiiska Drop ugu yaraan **LABA TODDOBAAD** ka hor haddii cunugaaga uusan ka-qeybgaleyn barnaamij aad ku codsatey foomka deeqda waxbarasho (bogga 2).Hadaad ka gaabiso in aad sidaa sameyso waxay keeni kartaa in cunugaaga uu waayo kaalmada daryeelka carruurta sannadka intiisa kale.(Foomka Ogeysiiska Drop ee laga helo Xarunta Bulshadaada).

* Cunugaaga (carruurtaada) waxaa laga doonayaa in ay **ka-geybgalaan ugu yaraan 60%** ee maalmaha barnaamij daryeel carruur kasta ee la codsadey.

Seattle
Parks & Recreation

Siyaasadaha deeqda waxbarasho ee daryeelka carruurta jirta da'da dugsiga.

Waaxda Jardiinnada iyo Madadaallada ee Magaalada Seattle (SPR) oo kaashaneysa Gollaha Madadaallada ee La Xiriira (ARC) wuxuu maamulaa gargaarka deeqda waxbarasho ee qoysaska ka soo baxa dhabbetuseyaasheenna dakhliga.

- Abaalmarinada deeqda waxbarasho waxaa loo sameeyaa qaab ku saleysan in loo adeeggo, qofka ugu hor imaada inta maaliyadaha la heli karo.
- Abaalmarinta deeqda waxbarasho si otomaatik ah **KUUGUMA** qoreyso barnaamijka aad doonayso, mana ku siinayso mudnaan.Waa in aad si toos ah isaga diiwaangeliso xarunta bulshada ee barnaamij kasta waana in aad raacdo dhabbetusayaashooda diiwaangelinta.
- Diiwaangelinta **LAMA DAMAANNAD-QAADIN** waxayna ku saleysan tahay booska iyo helitaanka.
- Waxaad mas'uul ka tahay in aad bixiso baaqiga kharashaadka barnaamijka oo ay ka mid yihiin dhammaan dhigaalka loo baahan yahay si loogu qabto boos diiwaangelinta cunugaaga (carruurtaada).
- Haddii aad sabab kasta aad doonayso in aad baajiso dhammaan ama qeyb kasta ee qoondada deeqdaada waxbarasho, waa mas'uuliyadaada in aad buuxiso foomka “Ogeysiiska Drop” ugu yaraan laba (2) toddobaad ka hor taariikhda barnaamijka.Hadaad ka gaabiso in aad bixiso ogeysiiska in aadan isticmaaleyn qoondada deeqda waxbarasho waxay keeni kartaa tijaabin ama in meesha laga saaro qoondada deeqda waxbarasho.
- Haddii cunugaaga (carruurtaada) ay ka qeybgalaan goob daryeel carruur oo bixisa ikhtiyaar qeyb-wakhti oo loogu talogaley Fasaxa jiilaalka, Fasaxa Bartamaha Jiilaalka, Fasaxa guga, ama Maalmaha shirka, waa in aad ku wargeliso goobta daryeelka carruurta laba (2) toddobaad ka hor inta maalmood cunugaaga (carruurtaada) ay qorsheynayaan in ay ka qeybgalaan.
- Cunugaaga (carruurtaada) waxaa **laga doonayaa in ay ka-qeybgalaan ugu yaraan 60% maalmaha barnaamijka si aad u haysato abaalmarinta deeqdaada waxbarasho.**Haddii sabab kasta cunugaaga (carruurtaada) uga bixi karin ka-qeybgalka ugu yar ee 60% ee loo baahan yahay, fadlan si degdeg ah u ogeysii xaruntaada bulshada.
  - Haddii cunugaaga uu hoos ugu dhaco ka-qeybgalka loo baahan yahay waxaa la gelin doonaa muddo tijaabin ah.Dhicitaanka labaad ee ka-qeybgalka hoose waxay keeni kartaa in meesha laga saaro qoondadaada deeqda waxbarasho.
- U-hoggaansamid la'aanta shuruudda ka-qeybgalka waxay keeni kartaa in ciqaab lagu waayo abaalmarinta deeqdaada waxbarasho ee sannad dugsiyeedka iyo/ama dhammaan Xeryaha Fasaxa (Xagaaga, Jiilaalka, Bartamaha Jiilaalka, iyo Guga), Maalinta Horumarka Xirfadka, Maalinta u Dhaxeysa Simistarada, ama Maalmaha Shirka.Haddii wakhti kasta deeqdaada waxbarasho aanan la isticmaalin abaalmarintaada waxaa laga yaabaa in si otomaatik ah loola noqdo.Marka lagaala noqdo barnaamijka Deeqda wabarasho, waxaa laga yaabaa in aadan awoodin in aad hesho deeq waxbarasho inta ka harsan wareegga.
- Deeqaha waxbarasho waxaa loo heli kara keliya Daryeelka Carruurta jirta Da'da Dugsiga ee La Xaqiijiyay.
- Abaalmarintaada deeqda waxbarasho si degdeg ah ayay isu beddeli kartaa haddii wakhti kasta ay isbeddelo ka jiraan dakhliga ama tirada dadka reerkaaga.Waa in aad siiso ogeysiis qoraal ah xafiiska deeqda waxbarasho oo ku qoran isbeddelo kasta.
- Deeqaha waxbarasho ee daryeelka carruurta waa kuwo aan loo wareejin karin xarun bulsho/goobo kale.Codsiga beddelaadda waxaa loo tixgelin doonaa si ku saleysan xaalad xaalad oo ku xiran helitaanka maaliyado iyo awoodda qorista ama diiwaangelinta.